



**demelza**

**Tilmaamo  
ku aadan**





## Mawduucyada

Kusoo dhawaaw Demelza	5
Laguu gudbiyay Demelza	6
Taageerada Farsamada ah	6
Bandhigyada Qoyska	6
Waxyaabaha lasii qabsan karo	8
Kooxo iyo nashaadaad	10
U gudbida adeegyada dadka waawayn	11
Baxnaaninada	12
Taageerada Walaalaha	14
Xiriiriyaha Qoyska	14
La-talin	16
Taageerada Inta lagu jiro Xiliga Uurka	17
Fasaxyo Gaaban	18
Daryeelka rugta caafimaadka Takhasuska	19
Daryeelka la xariira gabagabada nolasha	20
Taageerada Waayida Qof	21
Ilaalinta Badqabka	22
Guddiga Daryeelka Tayada	22
Wadaagista khibradahaaga	23





# Kusoo dhawaaw Demelza

Demelza waxay halkaan u joogtaa taageeradaada iyo taageerada qoyskaaga ee ku aadan tallaabo kasta - ayadoo ku siineyso taageero aan dhamaaneyn.

Demelza waxay daryeel aan caadi ahayn siisaa carruurta gaarka ah ee wajahaya xaaladaha halista ah ama dhimashada ka dhalan karto, ee ku nool guud ahaan Kent, South East London iyo East Sussex.

Waxaan taageeranaa qoysaska goorta iyo meesha ay ku rabaan inay ku helaan adeegyada - xarunteena daryeelka daruuriga ah, gurigaaga, meel xaafada ku dhextaala iyo oonleenka.

Anoo adeegsanayna labo goobood oo lagu bixiyo daryeelka dadka sii dhimanaya oo kuyaala Kent iyo South East London iyo xarun bulsho oo kutaala East Sussex, waxaan aad ugu dadaalnaa bixinta daryeel caafimaad oo habboon iyo taageero shucuur. Waxaan ka caawinaa carruurta inay kor u qaadaan hal abuurka, inay helaan madadaalo iyo inay yeeshaan xasuus.

Taageeradeena waa mid gaar ah sida ilmo kasta iyo qoys kasta waxaana ku saleyn doonaa xaaladaada si ay kuugu habboonaadaan. Maadaama aan leenahay khibrad ka badan 25 sano, adeegyo kaladuwan iyo koox kalkaalisoooyin ah oo takhasus leh iyo xirfaadlayaal caafimaad, waxaan sameyn doonaa dadaalkeena ugu habboon si aan u buuxino baahiyaha cunugaaga iyo kuwa qoyskaaga.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad jeclaan lahayd inaad la hadasho qof wax ka oggoow sida Demelza kuu caawin karto, fadlan la xariir kooxda gudbinta ood kala xariiri karto lambarkaan 01795 845253 ama [demelza.referrals@demelza.org.uk](mailto:demelza.referrals@demelza.org.uk).



## Usoo gudbinta Demelza

**Dhammaan adeegyada lagu xusay hagahaan waxaa loogu talagalay caruurta yaryar, carruurta, dhallinta iyo qoysaska la aqbalay inay helaan adeegyada Demelza.**

### Si uu u helo adeegyada Demelza cunugaagu waa inuu:

- Jiro inta u dhaxeysa 0-25 sano (waana inuusan ka wayneyn sanadkoodii16aad marka lasoo gudbiyay marka laga reebo inuu helaayo daryeelka khaaska ah ee gabgabada nolasha).
- Qabo xaalad halis ah ama uu kujiro xaalad dhimasho keeni karta.
- Ku nool yahay Kent, Medway, South East London ama East Sussex.
- Leeyahay waalid ama daryeel bixiye qaaday waajibaadka waalidnimada oo ay oggolaanshihiisa ku qoran tahay soo gudbinta.

Sidoo kale waxaan aqbalnaa gudbinta inta lagu jiro xiliga uurka (faahfaahinta waxaa laga heli karaa hagahaan).

Marka lasoo gudbiyo, daryeelka kalkaalinteena ayaa loo heli karaa ilmaha yaryar, carruurta iyo dadka yaryar ee jira illaa 18 sano. Dhammaan adeegyada kale waxaa la heli karaa ilaa 25 sano.

### Yaal qof u gudbin kara Demelza?

Qof walba ayaa sameyn kara gudbinta haddii uu qato oggolaanshaha waalidka, sida xirfadlaha shaqada bulshada iyo caafimaadka, sarkaalka ah xiriiriyaha qoyska ama macalinka dugsigu cunugaaga. Ka waalid ama daryeel bixiye ahaan sidoo kale waxaad cunugaaga si toos ah ugu gudbin kartaa Demelza ama dadka yaryar ayaga ayaa is gudbin kara.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad oggaato in qoyskaagu heli karo adeegyada Demelza iyo in kale, fadlan la xariir kooxda gudbinta ood ka wici karto 01795 845253, demelza.referrals@demelza.org.uk ama booqo [www.demelza.org.uk/refer](http://www.demelza.org.uk/refer).

## Taageero wax ku ool ah

Waxaan haysanaa mutadawiciin khaas ah oo tababaran oo kaa caawin kara adeegyada banaanka-gudaha ama hawlaha muddada gaaban si aad ugu hesho qaabka aad u dooneyso. Kuwaan waxay noqon karaan mashruuc yar sida qurxinta qol ama hagaajinta qalabka guriga, ama caawimaad guud sida jarista cawska ama nadiifinta guriga.

Haddii helida gaadiid kugu adag tahay, sidoo kale anaga ayaa ku qaadi karna, waxaana cunugaaga iyo qoyskaaga geyn karnaa ballamaha isbitaalka ama bandhigyada ama nashaadaadka Demelza.

Fadlan nagala soo xariir lambarkan 01795 845299 ama [practicalsupport@demelza.org.uk](mailto:practicalsupport@demelza.org.uk) markaas kadib waxaan yeelan doonaa wada sheekeysii ku saabsan



## Munaasabadaha qoyska

Inta lagu jiro guud ahaan sanadka waxaan qabaqaabinaa qorshooyin taxane ah, bandhigyo khaas ah oo loogu talagalay qoyska Demelza. Bandhigyada waxaa lagu qabaa guud ahaan deegaankeena waxaana kujira xalfadaha iyo barnaamijyo xiliyeedka nashaadaad ah. Munaasabadaha qoyska waxay kaliya ku saabsan yihiin sameyn xasuusyo wanaagsan, helida madadaalo iyo bixinta fursad ay iskula xariirayaan caruurta kale iyo qoysaska. Haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan bandhigyada soo socda waxaad iska qori kartaa wararkeena joogtada ah ee lasoo geliyo [familysupportdepartment@demelza.org.uk](mailto:familysupportdepartment@demelza.org.uk)





## Waxyaabaha khibradaha leh

**Waxaan fahansanahay in helida, baakinka iyo xarumaha ay marar qaarkood keeni karaan in la maareeyo caqabadaha cunugaaga. Tani waa sababta aan u aburnay nidaamka ballanta ee la xariira qaar kamid ah xarumaheena sida buuxda loo geli karo, si aad**

Demelza East Sussex ka ahaan waxaan leenahay qol dareen - la xariir 01323 446461 ama [eastsussex@demelza.org.uk](mailto:eastsussex@demelza.org.uk) si aad balan u qabsato.

Demelza Kent ka ahaan waxaan leenahay qol dareen, meel haboon oo lagu ciyaaro, qol shineemo ah, barkad dabaal iyo aagg banaan oo si buuxda loogu ciyaari karo - fadlan la xariir 01795 845270 ama [careadministration@demelza.org.uk](mailto:careadministration@demelza.org.uk) si aad balan u qabsato.

Xarumaheena waxaa loogu talagalay dhammaan qoysaska heli kara taageeradeena ayadoon la eegeyn meesha ay ku nool yihiin, marka haddii aad dooneyso inaad waqti uun ballan ka qabsato mid kamid ah goobaheena laakiin laga yaabo inay kugu adkaato inaad timaado meeshaas, haka meermeerin inaad lasoo xariirto kooxdeena mutadawiciinta ah ee bixiya taageerada si aad u oggaato inay kuu qabanqaabin karaan gaadiid kusoo qaada.



Jaxson wuxuu jecel yahay qolka dareenka - oo laga helo sariir leh biyo diiran oo ka dhigaysa mid dareema deganaan inkastoo xaalada qulqulka dhiigiisa uusan fiicneyn - waxaana hadda aadnay dabaasheena ugu horeysay ee barkada Demelza Kent, maadaama Jaxson laga yaabo inuusan dareemin deganaan uu ku isticmaal barkada dad waynaha. Waxaan helnay madadaalo





## Kooxaha iyo nashaadaadka

### Demelza Dots

Joog oo la ciyaar kooxda ciyaaraya ciyaaraha dareenka iyo madadaalada, waqtiyada ka sheekeynta sheekooyinka iyo isdhexgalka bulshada ayadoo waalidiinta iyo daryeel bixiyaasha wada sheekeysan karaan.

Waqti xaadirkaan waxaa lagu bixiyaa xarumaha dadka daryeelka gabagabada nolasha ee Kent iyo South East London, Xarunta East Sussex, ee kutaala xaafadeena East iyo West Kent waxaana jira qorshooyin lagu balaarinaayo laguna gaarsiinaayo goobo kale.

### Muusikada iyo farshaxanka

waxaan leenahay jadwal asbuuc ah oo la xariira nashaadaadka oonleenta ah sida khiRADaha isku dhafka ah ee sameynta farshaxan iyo kooxaha muusikada iyo baxnaaninta hal abuurka xagaaga ee sida toos ah looga qaybgalo, oo la sameeyo guud ahaan xiliyada fasaxyada xagaaga.

Baagaga dareenka muusikada ayaa loo diraa qoysaska kusoo biiraya kooxaha oonleenta si ay khiBRADO dareen kugu daraan hawlaha nashaadaadka.

Nagala soo xariir 01795 845270 ama [careadministration@demelza.org.uk](mailto:careadministration@demelza.org.uk) haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kooxahaan.



## U gudbida adeegyada dadka

Waxaan aaminsanahay in adeegyada ka gudbida carruurnimada iyo u gudbida adeegyada dadka waawayn aysan ahayn dhacdo hal mar ah laakiin tahay nidaam joogto ah oo taageero siiya qofka yar, qoyskiisa, iyo guud ahaan inta uu kujiro sanadyada dhallinyaranimada iyo u gudbida qaangaarnimada.

Laga bilaabo da'da 16 iyo illaa 25 sano, waxaan kaa caawin doonaa maareynta caqabado badan oo la xariira dhaqaalaha, daryeelka iyo gaarista go'aan, adoo taageero ka helaya hawl fududeeyaasha kalaguurka. Bixinta taageerada shucuurta iyo farsamada ayadoo yoolka la saaraayo qorsheynta hordhaca ah si dadka yaryar iyo qoysaskooda looga caawiyo ka wareehida Demelza iyo sida joogto ah ugu xirnaanta daryeelka iyo taageerada adeegyada dadka waawayn. Sidoo kale waxaan ka taageeri doonaa dadka yaryar tallo iyo nashaadaadka.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad nagala hadasho xog ku saabsan yoolka kalaguurka, fadlan nagala soo xariir lambarkaan 01795 845280 ama [familysupportdepartment@demelza.org.uk](mailto:familysupportdepartment@demelza.org.uk).





# Daaweynada farshaxanka hal

## **Baxnaaninta/Daaweynta Farshaxanka**

Baxnaaninta farshaxanka waxay shaqsiyaadka iyo kooxaha qoyska siisaa fursad ay ku isticmaalaan hal abuur loo maraayo sameynta farshaxan lagu muujinaayo hididaalo iyo dareenka qofka, iyo taageerada caruurta, dadka yaryar iyo dadka waawayn si wax looga qabto khibradaha aan wanaagsaneyn.

## **Baxnaaninta Muusikada**

Baxnaaninta muusikada waxay bixisaa fursad qofku ku dareemo dareen ayagoo u maraya ciyaarta muusikada, qorista hees, dhageysiga, eray bixinta, iyo u adeegsashada muusikada muujinta luuqada jirka iyo dhaqdhaqaaqa wajiga. Kulanadu waxay noqon karaan kuwo ku habboon baahiyahaaga, ku farxad, deganaan ama baashaal leh ama leh khibrado aan wanaagsan. Marka laga imaado qalabka muusikada, baxnaaniyaasha muusikada waxay adeegsadaan qalab dareen iyo teknoolajiyad si ay kor ugu qaadaan khibradaha muusikada.

Labadaba muusikada iyo baxnaaninta farshaxanka ee Demelza waxaa lagu bixiyaa qaybo ilaa lix kulan ah waxaana lagu heli karaa muuqaal ama qaab fool ka fool ah.

## **Baxnaaninta Qoob ka Ciyaarka**

Baxnaaninta dhaqdhaqaaqa jeeska waxaa kujira ciyaar dareen si kor loogu qaado mala awaalka iyo dareenka qofka iyo sidii muusikada, heesaha iyo dhawaaqyada habboon u dhiirigelin lahaayeen dhaqdhaqaaqa. Waxay ka caawisaa caruurta inay muujiyaan firfircoonidooda iyo farxadooda iyo sidoo kale inay ka baaraandegaan dareemada iyo shucuurta aad u adag. Baxnaaninta dhaqdhaqaaqa Qoob ka Ciyaarka waxay ku haboon tahay caruurta sameeya heerarka kamid ah dhaqdhaqaaqa ula kaca ah. Ilaa 12 kulan ayaa loosoo bandhigaa ilmo kasta asbuucii waxayna ka dhici karaan gudaha xarunteena East Sussex Hub, oo ku dhextaala dugsiga cunugaaga haddii ay tahay St. Leonards ama gurigaaga haddii ay kutaalo meel loo socon karo muddo 45 daqiiqo ah laga tago Hastings.

Haddii aad isleedahay waad ka faa'ideysan kartaa baxnaaninta farshaxanka, muusikada ama qoob ka ciyaarka, fadlan nagala soo xariir lambarkan 01795 845280 ama [familysupportdepartment@demelza.org.uk](mailto:familysupportdepartment@demelza.org.uk).



## **Daaweynta Jirka**

Kooxda waxay adiga iyo xirfadlayaasha kale ee caafimaadka ula shaqeyn doontaa si dhaw si loo sameeyo taageero baxnaanin jireed oo ay kujirto meel fiican dhigista, qaadista iyo qabashada qalabka loo baahan yahay, kobaca jirka, iyo xirfadaha maalinlaha ah ee nolasha iyo baxnaaninta jirka ee la xariirta neefmareenka. Waxaan awooda saareynaa inaan kor u qaadno madaxnaaninada, sida isticmaalida awooda iyo kartida ilmaha.

## **Daaweynta loo adeegsado biyaha**

Kooxda waxay bixin karaan kulano banaanka-gudaha biyaha lagu qabanaayo oo la xariira hagitaan ku aadan taageerada qabashada cunugaaga iyo sidii loosoo jeedin lahaa nashaadaad laga yaabo inay caawiyaan cunugaaga inta lagu jiro kulanka madadaalada qoyskaaga. Adeega ku daaweynta biyaha waxaa wakhti xaadirkaan loo sameeyay caruurta qaba xaaladaha caafimaadka laakiin adeegga muddo kadib waa la balaarin doonaa.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad nagala hadasho xog ku saabsan u gudbinta ilmaha baxnaaninta jirka ama baxnaaninta biyaha, fadlan nagala soo xariir lambarkan 01795 845270 or [careadministration@demelza.org.uk](mailto:careadministration@demelza.org.uk).



## Taageerada Walaalaha

**Barnaamijka taageerada walaalaha wuxuu awooda saaraa kobcinta shaqsi iyo horumarka shucuurta ayadoo carruurta laga caawinaayo fahanka iyo aqbalida caqabadaha ay wajahaan. Sidoo kale waxaan siinaa fursad ay ku noqonayaan kuwo yar, hela madadaalo iyo sidii ay u dhisi lahaayeen xariir ay la yeeshaan carruurta kale ee wajahaya isla caqabadaha haysta.**

Ayadoo loo maraayo isku dhafka kulanada khadka tooska ah ee fogaan araga iyo kuwa fool ka foolka ah, kooxaha iyo kulanada tooska ah, hawlaha iyo bandhigyada, waxaan siinaa goob ammaan ah walaalaha. Sidoo kale waxaanu sameynaa safar deegaan oo loogu talagalay da'da la beegsanayo inta lagu jiro fasaxyada xagaaga, oo walaalaha ay ku raaxaysan karaan, xusuus ku samayn karaan oo ay ku abuuri karaan saaxiibtinimo dhab ah oo cajiib ah.

Haddii cunugaagu doonaayo inuu maqlo waxyaabo badan, fadlana nagala soo xariir lambarkaan 01795 845280 ama [familysupportdepartment@demelza.org.uk](mailto:familysupportdepartment@demelza.org.uk).

## Xariiriyaha Qoyska

Wuxuu taageero wax ku ool ah iyo mid shucuur siiyaa qoyskaaga, waxaan haysanaa koox khibrad leh oo ah xirfadlayaal xiriiriyaal ah oo taageero ku aadan tallo iyo xog bixiya, muujin iyo taageero waji ka waji ah.

Waxaan leenahay Koox Qoys oo Gaar ah oo kuwada jirta Facebook, uu bixiya fursad dadku ku wadaagaan khibradaha kuna dalbadaan tallo ayadoo dhageysanaya bandhigyada iyo dhacdooyinka soo socda.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad la xariirto kooxda xiriiriyaha qoyska, kusoo biir bogageena Facebookka ama liiska qaybinta iimaylka fadlan nagala soo xariir lambarkaan 01795 845280 ama [familysupportdepartment@demelza.org.uk](mailto:familysupportdepartment@demelza.org.uk).





## La-talinta

Marka nolashu keento caqabado, waa ay adkaan kartaa in la helo goob iyo fursad lagu muujiyo dareenada ku xeeran arrintaan. Kadib qiimeynta, kooxdu waxay kaala hadli doontaa xog ku saabsan sida iyo goorta la-talinta noqon doonto mid wax ku ool ah. La-talintu waxaa heli kara dadka aan helin wax qabadyo daaweyn oo kale. Fadlan ogsoonow inay u badan tahay inay jiraan liis sugitaan.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad nagala hadasho xog ku saabsan la-talinta, fadlan nagala soo xariir lambarkaan 01795 845280 ama [familysupportdepartment@demelza.org.uk](mailto:familysupportdepartment@demelza.org.uk).



## Taageerada inta lagu jiro xiliga uurka

Inta lagu jiro xiliga uurkaaga, waxaa laga yaabaa in cunugaaga laga helo xaalad caafimaad oo wayn.

Sababo la xariira su'aalaha, walaacyada iyo welwelka arrintaan keeni karto, xirfadlayaasha xiriiryaasha qoyskeena, kalkaalisooyinka xirfadleyda ah iyo kaaliyaasha daryeelka caafimaadka ayaa bixin kara:

- **Taageero shucuur oo ay kujirto la-talin.**
- **Xasuus gaar ah oo la xariirta marka cunugaaga dhalanayo.**
- **Talo ku aadan taageerada joogtada ah ee adiga, cunugaaga iyo qoyskaaga laga yaabo inaad u baahataan.**
- **Codsiyada Qareenimada, dhaqaalaha iyo ogolaanshaha.**
- **Tallada dheefaha, taageerada walaalaha iyo muujinta.**

Fadlan kala hadal kooxdaada caafimaadka oo ay kujiraan Demelza arrimaha ku saabsan qorsheynta uurka ama nagala soo xariir lambarkaan 01795 845253, [demelza.referrals@demelza.org.uk](mailto:demelza.referrals@demelza.org.uk) ama [demelza.referrals@nhs.net](mailto:demelza.referrals@nhs.net) markaas waxaan si toos ah ula xariiri kartaa kooxdaada caafimaadka haddii aan helno oggolaanshahaaga.





## Fasaxyada gagaaban

### Xarumaheena daryeelka gabagabada nolasha

Fasaxyada daryeelka maalintii iyo habeenkii ee cunugaaga ayaa lagu bixiyaa xarunaha gabagabada nolasha ee Kent ama South East London oo ah meesha ay ku xanaaneen doonaan kalkaalisadeena iyo kooxda daryeelkeena.

Kooxdeena khibrada leh ayaa bixin doona taageero gaar ah oo loogu talagalay guud ahaan inta cunugaagu xarunta joogo, siinta fursad inuu ku raaxeysto khibradaha iyo ka qaybgalka nashaadaadka ku habboon baahiyihiisa.

### Gurigaaga

Kooxda kalkaalinta bulshadeena waxay taageero ku bixiyaan guriga qoyska. Waxaad codsan kartaa kulano soconaya 2 ilaa 4 saacadood waxaana wax ka badeli doonaa kulan kasta si uu u hesho nashaadaad madadaalo leh iyo caawimaad dareen, oo ku habboon baahiyaha gaarka ah ee cunugaaga.

Sidoo kale kalkaalisadeena khibrada leh waxay la shaqeysaa xirfadleyda daryeelka caafimaadka si ay guriga ugu bixiso daryeel caafimaad, oo aan kaala hadli karno.



## Daryeelka xarunta

### Ka bixista isbitaalka (nidaamka ka bixista goobta daryeelka)

Nidaamka ka bixista goobta daryeelka waxaa loogu talagalay carruurta diyaarka u ah inay ka baxaan isbitaalka laakiin aan awoodin, ama aan diyaarka u ahayn, inay si toos ah u aadan guriga.

Haddii cunugaagu kujiray isbitaalka, uu maray qaliin ama xaaladiisu isbadashay, kooxda kalkaalinteena iyo daryeelka ayaa kaa caawin kara barashada sida loo maareeyo jadwalka joogtada ah iyo daawooyinka.

Waalidiinta cusub, haddii cunugaagu ku dhashay xaalad aad u adag, waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay taageero dheeraad ah marka aad ka baxeyso isbitaalka marka koowaad. Kooxda kalkaalinta iyo daryeelka ayaa bixin kara tababar iyo taageero, waxayna kaa caawin karaan barashada sida loo qaato daawooyinka iyo daryeelka ilmahaaga, taageerada qorshooyinka aad ku adeegsanayso guriga.

### Maareynta astaamaha

Haddii cunugaagu leeyahay astaamo iyo xaalad caafimaad oo daran, kooxda kalkaalinta iyo daryeelka ayaa leh tababarka, khibradaha iyo aqoonta ay kaaga caawin karaan maareynta xaaladadaada si habboon. Waxaan si iskaashi ah ula shaqeyn doonaa xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyo xiriiriyaha cunugaaga ayadoo ay la wehliyaan shaqaalaha bulshada iyo shaqaalaha isbitaalka si ay u diyaariyaan joogista meel kamid ah goobaheena daryeelka gabagabada nolasha si loo maareeyo astaamaha cunugaaga.

Haddii cunugaagu uu hadda kujiro isbitaal, uu sugaayo qalliin aadna u baahan tahay taageero markaas kadib ama aad dareemeyso inaad ka faa'ideysan lahayd taageerada dheeraadka ah ee la xariirta daawooyinka cunugaaga ama astaamihiisa, fadlan la xariir kooxda gudbinta oo aad kala xariiri karto lambarkaan 01795 845253, demelza.referrals@demelza.org.uk ama demelza.referrals@nhs.net.





## Daryeelka ku aadan dhamaadka

**Demelza ka ahaan waxaan awooda saarnaa inaan ilmo kasta diyaar u noqono iyo qoyska noo baahan, inta ay kujiraan xaalada gabagabada nolasha.**

Kooxda daryeelka iyo kalkaalinta Demelza waxay si dhaw ula shaqeyn doontaa kooxda caafimaadka cunugaaga si ay u maareeyaan astaamo kasta oo laga yaabo in cunugaagu qabo ayadoo u maraya qaabka ugu habboon inta ay bixiyaan taageerada ruuxiga, dhaqanka iyo baahiyaha shucuurta ee qoyska guud.

Daryeelkan waxaa lagu bixin karaa midkood xarumaheena gabagabada nolasha iyo guriga qoyska.

Demelza waxay la shaqeyn doontaa shaqaalaha isbitaalka si ay gacan oga geysato bixinta qalabka caawiya neefta iyo qolalka baroordiiqda iyo qalabka takhasuska leh ayaa diyaar ah si ay kuugu taageeraan inaad u dhawaato ilmahaaga ilaa shan maalmood ka dib markuu indho.

Kooxdeena tababaran waxay kaa taageeri doonaan helida xasuus, sida daabacaada cagta iyo gacanta, sawiro, qaybo kamid ah muusikada ama farshaxanka iyo bokisyada xasuusta.

Haddii ay tahay markii koowaad ood timaado Demelza, soo gudbintu waxay caadiyan ka imaanaysaa kooxda caafimaadka cunugaaga. Haddii kale, waxaan qayb ka noqon doonaa wada hadalka iyo taageerada qoyskaaga ee ku saleysan daryeelka gabagabada nolasha. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la xariir 01795 845253.

## Taageerada baroor diiqda

Demelza ka ahaan, waxaan fahansanahay in khibrada waayida qof tahay arrin gaar ah; ma jirto hal qaab, ama qaab sax ah oo loo maareeyo baroordiiqda. Taageeradeena baroordiiqda ayaa ku bixinaa guud ahaan adeeggeena waxayna ku saabsan tahay ka taageerida qoys kasta xaaladaha nolashooda. Kooxdeena baroordiiqda waxay diyaar u yihiin inay taageeraan baahiyaha la sheego ee qoyska oo dhan iyadoo loo maraayo dhegaysi iyo xusuus. Tani waxay noqon kartaa mid toos ah, muuqaal ama taleefoon lagu sameeyo.

Waxaan qabanaa munaasabadaha baroordiiqda sanadka oo dhan, anagoo siinna waqti aan ku fikirno, dib u xasuusano oo aan la kulano qoysaska kale ee uu ka dhintay ilmo qoysaskuna waxay heli karaan koox gaar ah oo Facebook kujirta oo siinaya faham, taageero iyo macluumaad.

Taageeradeena baroordiiqda waa la heli karnaa mar walba oo ay qoysku u baahdaan. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada baroordiiqda Demelza fadlan la xariir kooxda Taageerada Qoyska adoo kala xariiraya khadkaan 01795 845280 ama [familysupportdepartment@demelza.org.uk](mailto:familysupportdepartment@demelza.org.uk).





## Ilaalinta Badqabka

**Badqabku waa tallaabo la qaado si kor loogu qaado daryeelka carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn lagana ilaaliyo waxyeellada.**

Demelza ka ahaan, ilaalinta badqabku wuxuu noo yahay mudnaanta koowaad ee heer kasta oo daryeel si aan u ilaalino badqabka iyo xaalada dadka.

Tababar ayaa la siiyaa saaxiibada Demelza ee ururka oo dhan iyo hogaankeena ilaalinta ee loo qoondeeyay waxay had iyo jeer diyaar u yihiin talo iyo taageero. Haddii aad aragto ama aad maqasho wax keenaya inaad ka welwesho cunugaaga, qof yar ama qof wayn oo nugul, xataa haddii aysan muhiim u muuqan, fadlan la xariir xubin katirsan kooxda ilaalinta badqabka Demelza - boostooyin ay ku qoran yihiin meelaha lala xariiro ayaa laga helaa guud ahaan xarumaha daryeelka gabagabada nolasha iyo webseedkeena.

## Guddiga Tayada Daryeelka

Demelza waxaa dusha kala socda Guddiga Tayada Daryeelka (Demelza is regulated by the Care Quality Commission, CQC) oo la socda, kormeera oo qiimeyn ku samee adeegyada daryeelka bulshada iyo caafimaadka si ay u bixiyaan inay buuxiyaan shuruudaha aasaaska ah ee la xariira tayada iyo badqabka.

### **Si aad u eegto warbixinteena fadlan booqo:**

Kent: <https://www.cqc.org.uk/location/1-119107818>

South East London: <https://www.cqc.org.uk/location/1-119107844>

## Nagala wadaagista khibradaada

Kooxdeena ka qaybgalka qoyska waxay xaqiijiyaan in adeegyada aan ku bixino Demelza waxay saameynta ugu badan keenayaan marka ay ka qaybgalaan laguma taageero qoysaska si ay u isticmaalaan.

### **Awood siinta iyo ka qaybgelinta qoysaska**

Codka qoyska waxaa haga kooxda daryeelka waalidka ee Demelza. Hadafkoodu waxaa inay wadaagaan khibradaha si ay gacan oga geystaan kor u qaadista adeegyada Demelza. Waxay qabanqaabiyaan kafateeriyo aan rasmi ahayn, shirar iyo bulshooyin loogu talagalay waalidka / daryeel bixiyaasha inay ku xidhmaan oo ay wadaagaan khibradaha. Sidoo kale waxaa jira koox Young Voices oo awooda saara inay carruurta iyo dadka yaryar helaan fursad ay kusoo bandhigaan rayigooda, kula kulmaan dadka kale kuna helaan madadaalo.

### **Waan dhageysaneynaa**

Waxaan mar walba eegeynaa qaababka aan ula shaqeyneyno qoysaska si aan u maqalno rayiga iyo khibradaha. Waxaan sameynaa sidaan anagoo u marayna la-talin toos ah, ka qaybgelida bandhigyada Demelza iyo qabashada xog aruurin. Sanad walba, waxaan qabanaa munaasabado Wada sheekeysii oo aan Caadi ahayn, oo qoysaska, saaxiibada Demelza, bixiyaasha adeegga dibada iyo kuwa kale ay kaga hadlaan mawduucyo gaar ah.

Si aad noola soo xariirto fadlan iimayl usoo dir [family.engagement@demelza.org.uk](mailto:family.engagement@demelza.org.uk) ama naga soo wac 01795 845293. Sidoo kale waxaad goobta ka qaadan kartaa kaarka lagu qoro falcelinta.



@demelzacharity



**Demelza Kent  
(Xafiska Diiwaanka  
gashan)**

Rook Lane, Bobbing,  
Sittingbourne, Kent,  
ME9 8DZ  
T: 01795 845200

info@demelza.org.uk

**Demelza  
South East London**

5 Wensley Close,  
Eltham, London,  
SE9 5AB  
T: 020 8859 9800

**Demelza  
East Sussex**

150a Bexhill Road,  
St Leonards-on-Sea,  
East Sussex, TN38 8BL  
T: 01323 446461

Xog badan ka hel:

**demelza.org.uk**

Registered Charity No. 1039651



Investors  
in Diversity  
Award

Working  
Towards



© Demelza 2023. Waxaa la  
cusbooneysiiyay Agosto 2023.